



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka**

Hadal-qoraalka kalfadhiga 3-aad

Documentiga Kol.3aad.F.16aad/2013

19/10/2013

**Kalfadhiga 3-aad
kulankiisa 16-aad
Guntinta: 128
Ajendaha:**

- 1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
- 2. Ansixinta ajendaha**
- 3. Qeybinta Hadal-qoraalka 8-13 ee kalfadhiga 3-aad**
- 4. Ansixinta hadal-qoraalka Horey loo qeybiyay 1-aad-7-aad ee kalfadhiga 3-aad**
- 5. Codeynta warbixinta Guddiga Xeer-hoosaadka loo xilsaaray**

**Shir-guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Muxamed Sheekh
Cusmaan (Jawaari),**

Guddoomiyaha wuxuu u sheegay Xildhibaanadii soo xaadiray in uu maanta shirka uu u qabsomi waayay kooram la'aan. wuxuu kaloo sheegay in ay ku dareen waqti halsaac dheeraad ah, kadib kooramkii wax iska badeli waayay. Guddoomiyuhu wuxuu u soo jeediyay Xildhibaanada markuu shir uu jiro in ay yimaadaan waqti hore si uu kooramka u buuxsamo una gutaan waajibaadkooda shaqo.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in uu shirka xiran yahay layskuna soo noqdo 21/10/2013 maalinta Isniinta, wuxuu Guddiga joogtada u sheegay in laysku imaanaayo maalinta berito ah ay saacadduna tahay 11:20am.